Ku deeq dhiiga xuduntaada!

Miyaad adigu/idinku rabtaan inaad ku deeqdaan? Buuxi hal:

- cadeyn caafimaad
- oggolaansho

Foomka waxa laga heli karaa adiga/idinka ummulisadiina, iyo xataa anaga boggayaga internedka

Ugu soo dir sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah:

Nationella Navelsträngsblodbanken
Sahlgrenska Universitetssjukhuset/Östra
416 85 Göteborg

Miyaad rabtaa inaad wax dheeraad ah ogaato?

Fadlan la soo xidhiidh mid kamid ah ummulisooyinkayaga anaga noo shaqeysa:

Wac 031-343 63 10 ama emayl u soo dir navelstrangsblodbanken.su@vgregion.se

Wax dheeraad ah ka akhri:
www.sahlgrenska.se/su/navelstrangsblodbanken

Macluumaadkan waxa sidoo kale lagu heli karaa luqadahan soo socda: Ingriisi, Faransiis, Isbaanish, Boolish, Ruush, Serbo-Korowaat, Turki, Carabi, Faarisi, Koonfurta Kudistaanta (Soraani), Soomaali,



VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN
SAHLGRENSKA UNIVERSITETSSJUKHUSET

Ku socda qofka dhawaan ilmo dhalaaya

Dhiiga xudunta ilmahaagu wuxuu badbaadin karaa nolol.

VÄSTRA GÖTALANDSREGIONEN
SAHLGRENSKA UNIVERSITETSSJUKHUSET

Naga caawi inaanu nololo badbaadino

Dhiiga xuduntu wuxuu leeyahay sifooyin naadir/gaar ah kuwaas oo loo isticmaali karo in nolol lagu badbaadiyo. Sidaas darteed dawladda Iswiidhan waxay go'aansatay inuu wadankeenu lahaado bangi qaran oo la dhigo dhiiga xudunta.

Marka ilme uu soo dhasho kadib, ayaa xaddi yar oo dhiig ahi uu ku hadhaa mandheerta iyo xundhurta. Dhiigan waxa ku jira unugyada abuura dhiiga, waxaana loo isticmaali karaa daaweynta dadka cudurada xunxun qaba, iyadoo lagu beeraayo unugyada abuura dhiiga. Tani waxa tusaale ahaan lagu isticmaalaa carruurta qabta cudurka kansarka dhiiga (leukaemia) ama cudurada kale ee dhiiga. Cuduradan waxa badanaa maanta lagu daaweeyaa iyadoo lagu beeraayo unugyada abuura dhiiga kuwaas ee laga soo qaadey unugyada dhiiga ee ku jira dhuuxa lafta, laakiin dhiiga xudunta ayaa noqon kara mid/fursad taas ka fiican

Ku deeqista dhiiga xudunta ee ilmaha waa mid ikhtiyaar loo yahay waxaanay u baahan tahay oggolaanshaha masuulka/masuuliyiinta.

CECILIA LANGENSKIÖLD
Dhakhtar sare oo caruurta
Masuulka caafimaadka ee Bangiga Dhiiga Xudunta ee Qaranka
(Nationella Navelsträngsblodbanken)
Sahlgrenska Universitetssjukhuset

Miyaad rabtaa inaad wax dheeraad ah ogaato, markaas ayaad:

- La soo xidhiidhi ummulisooyinkayaga:

  031-343 63 10

  navelstrangsblodbanken.su@vgregion.se

  Nationella navelsträngsblodbanken,
  Sahlgrenska universitetssjukhuset/Östra
  416 85 Göteborg

- Booqanaaya www.sahlgrenska.se/su/navelstrangsblodbanken

Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan deeqista dhiiga xudunta

Sidee ayaa qaadista dhiiga loo sameeyaa?
Umusha/dhalmada kadib ayaa dhiiga ka soo baxa madheerta loo oggolaanayaa inuu sii socdo hal daqiiqo, haddii qalliinka dhalmada lagu sameeyayna 30 ilbidhiqsi ka hor inta aan xudunta la duubin (la isku cadaadin) oo aan la jarin. Xudunta waxa jari doona adiga ama lamaanahaaga. Dhiiga ku hadhsan xudunta iyo mandheerta ayaa la ururinayaa oo la qaadayaa.

Dhakhtar carruurta iyo dhakhtar dhalmada ee jooga cisbitaalka jaamacada ee Sahlgrenska ayaa oggolaanaaya in dhiiga xudunta ee la qaadey la dhigo Bangiga Dhiiga Xudunta ee Qaranka.

Sidee ayaa dhiiga iyo macluumaadkaba loo maareynayaa?
Dhiiga laga soo ururiyey xudunta waxa loo dirayaa Bangiga Dhiiga Xudunta ee Qaranka, cisbitaalka jaamacada ee Sahlgrenska ee Göteborg, halkaas oo isaga oo la barafeeyay lagu kaydinaayo. Waxa halkaas ka heli kara cid kasta oo u baahan beerista dhiiga xudunta – ha joogaan Iswiidhan gudaheeda ama dibadeeda

Miyey jiraan wax baadhitaano ah oo loo baahan yahay in la sameeyo?
Waxaanu tijaabo dhiiga ah kaa qaadnaa markaad umulayso si aanu meesha uga saarno hadday jiraan cudurada caabuqa/infegshanada faafa ee halista ah kuwaas oo khatar u geysan kara caafimaadka qofka lagu beeraayo dhiiga xudunta. Wax tijaabo dhiig ah lagama qaado ilmaha. Macluumaadka adiga ku khuseeya iyo xaalada caafimaadka ee ilmahaaga ayaa la qorayaa/diiwaangaliyaa lana keydinayaa si ay noogu fududayso inaanu helno cid ku habboon dhiigga xundhurta

Haddii tijaabada dhiigaaga ama dhiiga xudunta ee ilmahaagu ay muujiso wax aan caadi ahayn, waxaanu kula soo xidhiidhi doonaa si aanu kuuga sheegno waxa ay tani ka dhigan tahay.

Waxaanu sidoo kale u baahan nahay inaanu ogaano waddanka aad adiga iyo aabaha ilmahau asal ahaan ka soo jeeddaan. Tani waxay naga caawinaysaa marka ay tahay inaanu go'aansano nooca nudda ee dhiiga ku jirta iyo marka dambe oo aanu go'aansanayno haddii dhiiga xudunta ee ilmahaagu ku habboon yahay bukaan/qof xanuunsanaaya oo gaar ah.

Nidaamka sir haynta/qarsoodiga caadiga ah ee laga isticmaalo daryeelka caafimaadka ayaa khuseeya macluumaadka adiga kugu saabsan iyo ka ilmahaaga, iyadoo xogtiinana loo maareyn doono si waafaqsan Xeerarka ilaalinta xogta (GDPR) si qof aan ruqsad u haysanini ugu heli karin macluumaadka. Waxa aad xaq u leedahay inaad ogaato macluumaadka aanu adiga iyo ilmahaaga idinka hayno ee diiwaankayaga ku jira.

Miyey jiraan wax diin ahaan mamnuuc ah?
Hoggaamiyayaasha hormoodka u ah bulshooyinka ugu waawayn Iswidhan, sida, kiniisadaha Kiristanka ee kala duwan, bulshada Yuhuuda iyo Muslimiinta ah, waxay bayaan wadajira ah dhammaantood ku sheegeen in diimahoogu taageerayaan ku deeqista dhiiga xudunta.

Miyay jiraan wax faa'iido gaar ah oo laga leeyahay?
Maya. Bangiga Dhiiga Xudunta ee Qaranku waxa uu ku shaqeeya iyadoo aan gabi aanba faa'iido gaar ah laga laheyn. Bangiga dhiigu waa xarun dadweynhu leeyahay markaa in waxa la dhigo si gaara loo isticmaalaayo ayaan la oggolayn.

Miyaanu markasta kaydsan karnaa dhiiga xudunta ilmahaaga?
Wakhti kasta oo maalinta ka mid ah ma qaadi karno dhiiga xudunta. Waxa sidoo kale dhici karta in dhiig aad u yar uu ku hadhsan yahay xudunta ka dib marka uu ilmahaagu soo dhasho oo aanay ku filnayn ku beeritaan. Haddii qadarka dhiigu uu aad ugu yar yahay in beeritaan lagu sameeyo, ayaa xaaladaha qaarkood loo isticmaali karaa cilmi-baadhis. Cilmi-baadhista noocan ah waxa markasta oggolaada Guddida anshaxa ee gobolka adiga ayaan go'aaminaaya haddii aad rabto in dhiiga loo isticmaalo cilmi-baadhis

Sidee ayaan haa ku dhahaa haddaan danaynayo inaan ku deeqo?
Taasi waxaad ku xaqiijineysa adigoo buuxinaaya laba foom; hal cadeyn caafimaad ah iyo hal oggolaansho ah. Kuwaas waxa laga heli karaa rugta ummulisadaada, iyo sidoo kale boggayga internedka. Xaqiijintaadu ma ahan mid ku qasbaysa – mar labaad ayaanu markaad soo gasho waadhka dhalmada ku waydiin doonaa.